KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 2aad — Muqdisho, Tr. 2 Lulyo 1974 — L. 7

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 17 Tr. 21 Abril 1974 — *Beddelaad Sharciga Wakaaladaha Xeerka Guddonshaha Golaha Sare ee Kacaanka L. 74 ee Tr. 22kii Abril 1972, (Staff Regulation of Autonomous Agencies).* Bog. 308

SHARCI L. 18 Tr. 22 Junyo 1974 — *Ilaalinta guud ee Warshadda Hargaha iyo Saamaha (Leather Tannery).* » 311

## BOGGA LABAAD

### XEER DOWLADEED

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 21 Abril 1974, L. 57 — *Dhul gadatay Jaalle Xaajiya Suldana Shire, ku fadhiya Mq. 500, kuna yaal Xamar Xafadda Medina.* » 312

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 21 Abril 1974, L. 58 — *Dhul gatay Jaalle Maxamed Jaamac Axmed ku fadhiya Mq. 4000, kuna yaal Muqdisho km. 4 Jidka Afgooye — Xamar.* » 313

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 21 Abril 1974, L. 59 — *Dhul gatay Jaalle Axmed Cali Cawad, ku fadhiya Mq. 456,23, kuna yaal Muqdisho Xafadda Medina.* » 314

XEER WASAARADDA BOSTADA IYO ISGARSIINTA, Tr. 20 Maayo 1974, L. 60 — *Baahi loo gabo in lagu daro qodob cusub arifada Teleksika.* Bog. 118

XEER WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA, Tr. 2 Junyo 1974, L. 61 — *Qiimaha bariiska waddanka laga beero.* » 119

XEER WASAARADDA GAADIIDKA, Tr. 2 Maarso 1974, L. 62 — *Dhisid guddi tijaabada iyo imtixaanada baaburta Gobolka Jubada Hoose.* » 320

---

# BOGGA SEDEXAAD

## TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Cusman Shikh Aaden. (142)* Bog. 321

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Cabdirashid Shikh Nuur. (143)* » 322

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Cabdi Guled Xersi Sharmarke. (144)* » 322

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Caasha Ismaciil Jaamac. (145)* » 323

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Baddalaad Naada Dhul *Jaalle Muumin Abooke Abukar iyo Amina Xasan Awes. (146)* » 323

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Baddalaad Naada Dhul *Jaalle Maxamed Abdulqadir Cabduraxman (147)* » 324

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Baddalaad Naada Dhul *Jaalle Qaasim Cali Maxamed. (148)* » 324

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Baddalaad Naada Dhul *Jaalle Moxidiin Cadoow Maxamed. (149)* » 325

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Baddalaad Naada Dhul *Jaalle Cabdulqaadir Cali Xersi. (150)* » 325

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Baddalaad Naada Dhul *Jaalle Maryan Cabdulle Siyaad. (151)* » 326

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Baddalaad Naada Dhul *Jaalle Khadija Abuukar Sheeqey. (152)* » 326

DEGMADA BAYDHOBA, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Xaaji Salax Cabdurarabа. (153)* Bog. 327

MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR, Ogeysiis dhumid Jeeg L. 015617, *Farax Yuusuf Madar. (154)* » 327

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA, Ogeysiis dhumid Jeeg L. 0645, *Cosob Maxamed Rooble. (155)* » 328

BANKIGA QARANKA SOMALYEED, Ogeysiis Heerka *Sarrifka Lacagaha Qalaad. (156)* » 329

BANKIGA QARANKA SOMALYEED, Ogeysiis Heerka *Sarrifka Lacagaha Qalaad. (157)* » 330

BANKIGA QARANKA SOMALYEED, Ogeysiis Heerka *Sarrifka Lacagaha Qalaad. (158)* » 331

BANKIGA QARANKA SOMALYEED, Ogeysiis Heerka *Sarrifka Lacagaha Qalaad. (159)* » 332

BANKIGA QARANKA SOMALYEED, Ogeysiis Heerka *Sarrifka Lacagaha Qalaad. (160)* » 333

**SHARCI L. 17 Tr. 21 Abril 1974.**

**Beddelaad Sharciga Waèaaladaha Xeerka Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka L. 74 ee Tr. 22kii Abril 1972, (Staff Regulation of Autonomous Agencies).**

GUDDOONSHAHA

GOLOHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Xeerkii Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka tiradiisuna ahayd 74 ee 22kii Abril 1972 kuna saabsan shaqaalaha Wakaaladaha (Staff Regulations of Autonomous Agencies);

ISAGOO ARKAY Sharciga tiradiisu tahay 29 ee soo baxay 1dii Abril 1970 ee ku saabsan shaqaalaha Dawladda (Civil Service Law);

ISAGOO AQOONSADAY Baahida loo qabo in la mideeyo shaqaalaha Dawladda iyo kan Wakaaladaha;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha ee Kacaanka;

WUXUU XEERAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

*Ulajeeddo*

«Xoghayaha» Waxaa loola jeedaa Xoghayaha Dawladda ee Wakaaladdu raacsan tahay ama hay'da kale ee Maamulka Wakaaladda kor laaliye ka ah.

«Sharciga» Waxaa loola jeedaa sharciga shaqaalaha Dawladda ee tiradiisu tahay 29 ee 1dii Abril 1970 iyo isbeddelkii lagu samayey.

«Xeerka» Waxaa loola jeedaa xeerka uu soo saaray Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka tiradiisuna tahay 74 ee 22kii Abril 1972.

«Wakaaladaha» Waxaa loola jeeda Wakaaladaha Dawladda ee madaxa bannaan.

Qodobka 2aad

Xeerka Wakaaladaha waxa lagu darayaa qodob cusub oo tiradiisu ahaan doonto 1 A loona akhdiyi doono sida hoos ku qoran:

### Qodobka 1A

*Awoodda Xoghayaha*

1. Xoghayaha Dawladdu wuxuu Wakaaladda ku leeyahay awood masuuliyad buuxda xagga jaangooyada, dhaqaalaha iyo horumarinta, hagaagsanaanta xisaabaadka, gadashada iyo sii gadidda qalabka ama alaabta Wakaaladda iyo wixii heshiis ganacsi ah (Commercial Contracts) ay gelayso iyadoo la tixgelinaya qodobada sharciga iyo sharciyada kale ee yaalla.

2. Xagga maamulka, Maareeyaha Guud ee Wakaaladdu wuxuu yeelan doonaa awood iyo masuuliyad la siman ta uu leeyahay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda sida lagu tilmaamay qodobka 3aad ee sharciga u yaal Xafiisyada Dhexe ee Dawladda (General Organisation of the Central Offices of the Government) xeerka tiradiisu tahay 316 ee soo baxay 17kii Disember 1962.

### Qodobka 3aad

Qodobka 2aad ee xeerka waxaa lagu darayaa xubin 3aad oo loo akhriyi daano sida hoos ku qoran:

«3. — Dhismaha Gudaha (establishment) ee Wakaaladda waa in la waafajiyo lifaaqa ku vidhan sharciga iyo xeerka u yaal shaqaalaha Dawladda xagga darajada iyo mushaharka iyadoo lagu xisaabtami doono tacliinta, sancada iyo masuuliyadda».

### Qodobka 4aad

Qodobka 4aad hubintiisa 3aad waa la tirtiray oo waxa lagu beddeley xubin cusub oo ah:

«3. — Imtixaanka tartanka shaqaalaha Wakaaladaha waxaa lagu xilsaaray Guddiga Imtixaanka ee lagu dhisay sharciga ~~shaqaalaha Dawladda qodobka 10aad»~~.

L. 65 t. 20 - 11 - 1974 Qod. 6aad.

### Qodobka 5aad

Waxaa lagu daray xeerka qodob dheeraad ah 4A oo ah:

### Qodobka 4A

*Habka Qoridda Shaqada*

1. Iyadoo la raacaayo qodobka xeerea iyo sharciyada yaalla qoridda shaqalaha Wakaaladda waxaa lagu hirgelinayaa habka soo socda:

(i) Shaqaalaha Wakaaladda ee derajadoodu tahay «A» iyo «B» waa in qoritaankoodu ku soo baxo xeer (decreto) uu saxiixo Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka.

(ii) Shaqaalaha Wakaaladda ee derejadoodu ka hooseyso kuwa kor lagu sheegay waa in qoritaankoodu ku soo baxo xeer (decreto) uu saxiixo Agaasinka Guud ee Shaqaalaha Dawladdu.

Haddii ay la noqoto, Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka wuxuu qori karaa shaqada Wakaaladda imtixaan la'aan qowkii haysta shahaado Jaamici ah. Xagga qoritaanka, dallacaada, asluubta iya ka saaridda shaqada, Guddoonshuhu wuxuu shaqaalaha Wakaaladda ku lahaan doonaa awood gaar ah sida lagu caddeeeyey sharciga tiradiisu tahay 14 ee 31-1-1972.

Qodobka 6aad

Waxaa laga tirtiray xeerka erayda «and in conformity with the recommendation of Management Committee» ee ku qoran qodobka 14aad ee Xeerka xubintiisa labaad (2).

Qodobka 7aad

Waxaa lagu darayaa xeerka qodob cusub oo loo aqoonsandoono qodobka 15aad Bis loona akhriyi doono sida hoos ku qoran:

Qodobka 15 Bis

*Dallacaadda shaqaalaha Wakaaladda*

(i) Guddida Dallacaadda ee Wasaaradda sida uu qoraayo qodobka 35 ee sharciga shaqaalaha ayaa lagu xilsaaray inay fiiriso ra'yina ka bixiso wixii dallacaad ah ee loo soo qoro shaqaalaha Wakaaladda.

(ii) Guddida Wasaaraddu waa inay go'aankeeda ku saabsan dallacaadda u gudbiso Guddida Dallacaadda ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka sida lagu caddeeyey sharga lam. 16 ee 26 Noofember 1973.

Qodobka 8aad

Waxaa Xeerka lagu darayaa qodob cusub oo dheeraad ah laguna tilmaamayo 45 Bis oo loo akhriyi doono sida hoos ku qoran:

Qodobka 45 Bis

1. Haddii Wakaaladdu faa'ido weyn soo geliso dhaqaalaha Dawladda, shaqaalaheeda waxaa la siin karaa abaalgud ah qayb gaadhaysa 5% oo faa'idadas ah.

2) Shaqaalihii soo hindisa farsamo ama hab ha noqdeen waaxid ama wadar, waxay yeelan karaan abaal-gud gaar ah.

Qodobka 9aad

Haddiii ay jiraan arrimo ku saabsan maamulka oo aan lagu xusin xeerean Wakaaladdaha waa inay Wakaaladuhu ku dhaqmaan qodobda sharciga shaqaalaha Dawladda ee arrimahaas saameynaaya.

Qodobka 10aad

Wixii Sharci ama xeer ah ee aan la socenin ama ka soo hor jeeda sharcigan waa la tirtiray.

Qodobka 11aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee kacaanka, waxaana soo lagu saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 21 Abril 1974.

*Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

---

**SHARCI L. 18, Tr. 22 Junyo 1974.**

**Ilaalinta ee Warshadda hargaha iyo saamaha (Leather Tannery).**

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Wershadda Hargaha iyo Saamaha (Leather Tannery) waxay ilaalinteeda guud hoos iman doontaa Wasaaradda Sancada.

Qodobka 2aad

Sharciga tiradiisu tahay 16 ee 15kii Jannaayo 1973, iyo wixii kale eexeer ama sharci ah ee ka soo hor jeeda sharcigan waa la baabi'iyey.

Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu dhagan gelayaa maalinta la saxeexo, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

*Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre*
MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

---

## BOGGA SEDEXAAD

### XEER

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
**Tr. 21 Abril 1974, L. 57.**

**Dhul gadato Xaajiya Suldana Shire — ku fadhila mq. 500 kuna yaal Xamar — Xafadda Medina.**

XOGHAYAHA WASAARADDA HAWLAHA GUUD

ANNOGOO ARAGNAY Xaashaddi kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynunkii Kowaad ee 21 Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 144 ee taarikhdeeduna aheyd 23 Maajo 1961;

ANNAGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 41 taarikhdeeduna aheyd 13-9-1973;

ANNAGOO ARAGNAY Faafin Rasmi ah taarikhdeeduna yahay 28 Ago. 1966 lambarkooduna yahay 8-8, oo caddeyneyaa in Xasan Xusen Cali iyo Cali Xusen Cali la siiyay dhul Dawladeed ee ku fadhiya 1.000, mq. kuna yaal Muqdisho — Xafadda Madina;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolansihii guddiga Farsamada dhismaha uu ku saabsaneed naqshadda dhismaha labarkoodu yahay 8256 bishii 28-9-1968, soona gudubtay fadhigii 292°aad ee 15-8-1962;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolansihii gudiga farsamada dhismaha uu ku saabsaneed naqshadda dhismaha L. 57 ee laguna badalay naqshadda L. aheyd 8256, soona gudubtay fadhigii 14° aad taarikhdeeduna aheyd 22-1-1974;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda hobsinada dhulka ay qortay Xafiiska Farsamada dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud taarikhdeeduna aheyd 23-3-1974, wahay caddeyneysa in dhismaha iyo naqshadda L. 57 ee 2-1-1974, soona gudubtay fadhigii 14°aad ee 22-1-1974 ay is waafiqsanyihiin;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda so qortay Xafiiska Dawladda Hoose L. 600 taarikhdeeduna aheyd 6 Feb. 1974 caddeyneso dhismaha guriga oo waafaqsan naqshadda dhismaha;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 1360. taarikdeeduna aheyd 18 July 1973, oo lagu qoray buuga Canshuurta Dadban L. 342 Vol. 20, oo lagu dhigay Notayahay Sr. Maxamed Xasan Jasti oo ku saabsan kalagadasho dhul uu iibsadeen Xasan Xajiya Xusen Cali iyo Cali Xusen Cali oo ka gadatay Jaalle Xajiya Suldana Shire Cali — dhulka la mid ah mq. 500, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Madina;

ISAGOO AQOONSADAY in waajibatikiisi inu ka bahday qofka kor ku soo sheegnay;

AMAR XEER

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xajiya Suldana Shire Cali la siiyay una gadatay dhulka ah mq. 500, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Madina.

Sohdimaha: Kofur dhul u leyahay Sh. Maxamud Faqi, Galbeed Jidka Madina, Bari Cabdulle Assir Afrax iyo Abuukar Maxamed Axmed, Waqoyna dhul u leyahay Cabdalla Cali Salax.

Moqdisho,21 Abril 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*G. Sare Maxamed Sheekh Cosmaan*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 10.*
*Mogadiscio, li 2 Maggio 1974.*
*Il Sostituto Magistrato ai Conti:*
Jaalle MAXAMED CALI FARAX

---

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
**Tr. 21 Abril 1974, L. 58.**

**Dhul gatay Jaalle Maxamed Jamac Axmed — ku fadhiya mq. 4.000, kuna yaal Muqdisho — Km. 4, Jidka Afgooye — Xamar.**

XOGHAYAHA WASAARADDA HAWLAHA GUUD

ANNAGOO ARAGNAY Xaashaddi Kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iya Qaynunkii Kowaad ee 21 Okootober 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 144 ee taarikhdeeduna aheyd 23 Maajo 1961;

ANNAGOO ARAGNAY Arji u soo qortay Xasan Warsame Cali taarikhdeeduna aheyd 5-12-1960, uu ku weydiisanayey dhul dhismo Dawladeed kuna yaal Muqdisho — Km. 4° Jidka Afgooye;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dulka a ee lagu dhejiyay Xafiiska ku shaqalahaa, laguna daabacay hashida rasmiga ah ee Dawladda Lamb. 4 taarikhdeeduna aheyd 1 Abril 1961;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolansihii gudiga Farsamada dhismaha uu ku saabsaned naqshadda dhismaha lambarkoodu yahay 6222 bishii 9 Majo 1961, soona gudubtay fadhigii 270°aad ee 9-5-1961;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolansihii gudiga farsamada dhismaha uu ku saabsaned naqshadda dhismaha lamb, 5866 ee laguna badalay naqshadda lamb. yahay 6222, soona gudugbtay fadhigii 311° ee 20 Maajio 1963;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolansihii gudiga farsamada dhismada uu ku saabsaneed dhismaha lamb. 4284 ee laguna badalay naqshadda lamb. aheyd 5866, soona gudubtay 16°aad taarikhdeeduna aheyd 6-8-1968.

ANNAGOO ARAGNAY Waqadda tiradeedu ahay lamb. 223 taarikhdeeduna aheyd 21-1-1962, in Jaalle Xasan Warscame Cali uu dhiibay Xafiiska Canshuurta Dadban lacag tiradeedu tahay Sh. So. 2.009,65, oo ah qiimahii dhulka;

ANNAGOO ARAGNAY Xaashadda ku saabsan siismaha dhulka lambarkoodu yahay 540647 taarikhdeeduna tahay 7-3-1962, in ninka kor ku magacaaban la siiyay dhul ku fadhiyaa mq. 4.000, kuna yaal Muqdisho — Km. 4° Jidka Afgooye;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda soo qortay Xafiiska Sixadda lamb. 12380 Prot. taarikhdeeduna tahay 21 Agosto 1968, oo caddeyneyso dhismaha guriga oo waafaqsan naqshadda dhismaha;

ANNAGOO ARAGNAY Xaashadda hobsinada dhulka ay Xafiiska Farsamada dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, oo waafaqsan dhismaha guriga taarikhdeeduna aheyd 15-9-1968;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 1885 taarikhdeeduna aheyd 8-3-1962, oo lagu qoray Buuga Canshurta L. 38 Xafiiska Canshuurta eena lagu dhigay Xafiiska Notayha Dr. Maxamed Warsame oo ku saabsan kala kadasho dhul uu gade Xasan Warsame Cali oo ka gatay Polegato Giovanni dhul ku yaal Muqdisho — Km. 4° Jidka Afgooye — Xamar — dhulka la mid ah mq. 4.000;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 1448 taarikhdeeduna aheyd 15-3-1962, oo lagu qoray buuga Canshurta Dadban L. 571 oo ku qaabsan kla gadasho dhul uu gade Polegato Giovanni oo ka gatay Dr. Maxamed Warsame Cali, dhul ku yaal Muqdisho — Km. 4° — Jidka Afgooye — Xamar, dhulka la mid ah mq. 1.500;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka, taarikhdeeduna aheyd 10 Agosto 1962, oo lagu qoray Buuga Canshuurta L. 515 — Vol. 12 — oo ku saabsan kala gadasho dhul uu gade Dr. Maxamed Warme Cali Danet, oo ka gatay Xusen Hilole Warsame — dhu ku yaal Muqdisho, Jidka Afgooye Km. 4° — dhulka la mid ah mq. 1.500;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 2983 taarikhdeeduna aheyd 19 Eett. 1962, oo lagu qoray Buuga Canshuurta Dadban L. 588 Vol. 12, eena lagu dhigay Xafiiska Notayaha Dr. Maxamed Warsame Cali Danet, oo ku saabsan kala gadasho dhul uu gade Jaalle Xusen Hilole Warsame oo ka gatay Jaalle Noviello Giuseppe iyo Riva Angelo, dhul ku yaal Muqdisho — Km. 4° Jidka Afgooye, dhulka la mid ah mq. 1.500;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 2222 Rep. taarikhdeeduna aheyd 23 Abril 1963, oo lagu qoray Buuga Canshuurta Dadban L. 227 eena lagu dhigay Xafiiska Notayaha Micheal Joseph Mariano, oo ku saabsan kala gadasho dhul uu gade Jaalle Riva Angelo oo ka gatay Jaalle Polegato Giovanni. dhul ku yaal — Muqdisho Km. 4° Afgooye — dhulka la mid ah mq. 750;

ANNAGO ARAGNAY Nuqulka L. 3955 Rep. taarikhdeeduna aheyd 24-2-1964, oo lagu qoray Buuga Canshuurta Dadban, 1.481 Vol. 14, eena lagu dhigay Xafiiska Notayaha M. J. Mariano, oo ku saabsan kala gadasho dhul uu gade Polegato Giovanni oo ka gatay Jaalle Maxamed Jaamac Axmed — dhul ku yaal — Muqdisho — Km. 4° Jidka Afgooye, dhulka la mid ah mq. 3.250;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 3956 Rep. taarikhdeeduna aheyd 24-2-1964, oo lagu qoray Buuga Canshuurta Dadban, L. 481 — Vol.14, eena lagu dhigay Xafiiska Notayaha M. J. Mariano oo ku saabsan kala gadasho dhul uu gade Polegato Giovanni oo ka gatay Jaalle Maxamed Jaamac Axmed dhul ku yaal — Muqdisho — Km. 4° Jidka Afgooye — dhulka la mid ah mq. 750;

ISAGOO AQOONSADAY in waajibatikiisi innu ka bahay ninka kor ku so sheegnay;

AMAR XEER

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Jaamac Axmed la siiyay dhul Dawladeed ee ku fadhiyaa mq. 4.000, kuna yaal Muqdisho — Km. 4° Jidka Afgooye.

Muqdisho, 21 Abril 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*G. Sare Maxamed Sheekh Cosmaan*

*VICTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 15.*
*Mogadiscio, li 7 Maggio 1974.*
*Il Sostituto Magistrato ai Conti:*
Jaalle MAXAMED CALI FAARAX

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Tr. 21 Abril 1974, L. 59.

Dhul gatay Jaalle Axmed Cali Awad — ku fadhiya mq. 456.23, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Madina.

## XOGHAYAHA WASAARADDA HAWLAHA GUUD

ANNAGOO ARAGNAY Xaashaddi Kowaad iyo tii labaat ee Kacaanka iyo Qaynunkii kowaad ee 21 Oktoobar 1969;

ANNOGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 115 taarikhdeeduna ahayd 13 Sett. 1956;

ANNAGOO Arji u soo qortay Jaalle Madina Maxamuud Maxamed, taarikhdeeduna ahayd 14-8-1962, uu ku weydiisanasay dhul dhismo Dawladeed kuna yaal Muqdisho — Xafadda Hodan;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dhulka a ee lagu dhejiyay Xafiska ku shaqa lahaa, laguna daabacay hashida rasmiga ah ee Dawladda Lamb. 1-5 taarikhdeeduna ahayd 15-5-1972;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolansihii gudiga farsamada dhismaha uu ku saabsaneed naqshadda dhismaha labarkoodu yahay 7782 bishi 26 Majio 1964, soona gudubtay fadhigii 335°aad ee 18-7-1964;

ANNAGOO ARAGNY Ogolansihii gudiga farsamada dhismaha uu ku saabsaneed naqshadda dhismaha lamb. 20072 ee 27-7-1970, laguna badalay naqshadda lamb. yahay 7782, soona gudubtay fadhigii 8°aad ee 11 Agosto 1970;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda tiradeedu yihiin L. 58767 ee 13 Jun. 1960, iyo L. 26849 ee 24 Agosto 1964, in Jaalle Madina Maxamuud Maxamed ay dhiibtay Xafiska Canshuurta Dadban Lacag tiradeedu tahay Sh. So. 284,00, oo ah qiimahii dhulka;

ANNAGOO ARAGNAY Xashadda ku saabsan siismaha dhulka lambarkoodu yahay 548211 - 932072 taarikhdeeduna tahay 26-8-1964 — 14-6-1966, in kofka kor ku magacaaban la siiyay dhul ku fadhiyaa mq. 565,50, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Hodan;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda soo qortay Xafiska Sixada L. 2089 ee 17-2-1972, oo caddeyneyso dhismaha guraga oo waafaqsan naqshadda dhismaha;

ANNAGOO ARAGNAY Xaashadda hobsinada dhulka ay Xafiska Farsamada dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, oo waafaqsan dhismaha guriga taarikhdeeduna ahayd 14-4-1974;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 7683 taarikhdeeduna ahayd 19 Abril 1966, oo lagu qoray buuga Canshuurta Dadban, L. 277 Vol. 20, oo lagu dhigay Notayaha Sr. M. J. Mariano oo ku saabsan kalagadasho dhul uu iibsaday Madina Maxamuud Maxamed oo ka gatay Axmed Cali Awad — dhulka ku yaal Muqdisho — Xafadda Hodan;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 1908 taarikhdeeduna ahayd 27-3-1972, oo lagu qoray buuga Canshuurta Dadban L. 277 Vol. 20, oo lagu dhigay Notayaha Dr. Benvenuto Francesco Issak — ooku saabsan kalagadasho dhul uu iibsaday Axmed Cali Awad oo ka gatay Bashirali Rasheed Muraj, Ismacil Rasheed Muraji iyo Maxamedtaki Ismacil Rasheed Muraj — dhulka la mid ah mq. 109,27, Kuna yaal Muqdisho — Xafadda Hodan;

ISAGOO AQOONSADAY in waajibatikiisi innu ka bahay ninka kor ku so sheegnay;

AMAR XEER

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Cali Awad la siiyay una gatay dhul Dawladeed ee ku fadhiya mq. 456,23, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Hodan.

Muqdisho, 21 Abril 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud

*G. Sare Maxamed Sheekh Cosmaan*

*VISTO e registrato - Reg. n.1, foglio n. 18.*

*Mogadiscio, li 7 Maggio 1974.*

*Il Sostituto Magistrato ai Conti:*

Jaalle MAXAMED CALI FAARAX

**XEER WASAARADDA BOSTADA IYO ISGARSIINTA**
**Tr. 20 Maajyo 1974, L. 60.**

**Baahi loo qabo in lagu daro qodob cusub Tarifada Teleksika.**

XOGHAYAHA WASAARADDA BOSTADA

ANIGOO ARKAY Warqaddii koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka Oktoobar 1969;

ANIGOO ARKAY Qodobka 4aad ee Sharciga Teleksika u yaal lambarka 66aad ee 25kii Setember 1971;

ANIGOO ARKAY Qodobka 4aad Tarifada Teleksika u yaal lambarka 10aad ee 15kii Disember 1971;

ANIGOO TIXGELINAAYA Baahida loo qabo in lagu daro qodob cusub Tarifada Teleksika;

WAXAAN XEERAY

Qodobka 1aad

Haddi heyad ka tirsan heyadaha Dawladaha u baahata inay ku isticmaasha xidhiidh Teleksik oo toos isugu xidha laba meelood (Local Lines) iyadoon la soo marin gubiyaha (Central Exchange) dhexe, waa in marka hore rukhsad aay soo weydiistaan Xoghayaha Wasaaradda Bostada iyo Isgaarsiinta.

Marka rukhsad laga helo Xoghayaha Wasaaradda Bostada iyo Isgaarsiinta, waa in la bixiyo lacagta hoos ku qoran:

b) Kharashka gelinta alaabta makiinadiiba waa So. Shs. 3.400 lana bixiyo marka alaabta la xidhayo.

t) Ijaarka alaabta Teleks midkiiba oo sanadkiiba la hormariyo waa So. Shs. 6.000.

j) Qiimaha yeerista (fees for calls) So. Shs. 2.700 (bishiiba).

Qodobka 2aad

Amar xeerista lagu soo dhigi doona warqadda Faafinta rasmiga ah ,Official Bulletin) ee Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaalieed waxanu hirgeli doona marka laga bilaabo saxiixa Xoghayaha Wasaaradda Bostada iyo Isgaarsiinta.

Muqdisho, 20 Maayo 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Bostada iyo
Isgaarsiinta
*G.le Dhexe Axmed Maxamuud Faarax*

Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda
*Jaalle Dr. Maxamed Yuusuf Weyrax*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 57.*
*Mogadiscio, 30 Maggio 1974.*
*Il sostituto Magistrato ai Conti:*
Jaalle MAXAMED CALI FAARAX

XEER WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA
Tr. 2 Junyo 1974, L. 61.

Qiimaha Bariiska Waddanka laga Beero.

XOGHAYAHA WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA

MARKII UU ARKAY go'aankii 1aad iyo kan 2aad ee Kacaanka 21-10-1969;

MARKII UU ARKAY Sharciga Lamb. 17ka oo soo baxay 17-6-1967 ee ku saabsanaa ilaalinta qiimaha alaabta lagama maarmaanka ah;

MARKII UU ARKAY ogaaday in loo baahan yahay in sicir loo gooyo bariiska Weddanka laga beero;

MARKII UU ARKAY taladii Guddiga Sicirka Alaabta lagama maarmaanka ah;

WUXUU DEJINAYAA XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1

Qiimaha bariiska Waddanka laga beero waxuu ahaandoonaa sida hoos ku qoran:

| | Qiimaha WGU ay kaga iibsandoonta Beeralayda, kintaalki saafiga ah (Kg. 100): |
|---|---|
| Bariiska «Upland type» | Sh. So. 220 |
| Bariiska «Paddy type» | » » 200 |

Bariiska waa inuu ahaadaa kuwo saafi ah, galka laga bixiyay, kuna jira jawaan.

Qodobka 2

Bariiska waxaa beeraleyda ka gadan kara Wakaaladda Ganacsiga Ummadda qura.

Qodobka 3

Xeerkan wuxuu hirgalayaa si deg-deg ah, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Waxaa laga amrayaa qof waliba in uu dawro, ilaaliyana hirgelinta isaga ah.

Muqdisho, 2 Junyo 1974.

XOGHAYAHA DAULADDA
*Jaalle Axmed M. Maxamuud*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 62.*
*Mogadiscio, 6 Giugno 1974.*
*Il Sostituto Magistrato ai Conti:*
Jaalle MOXAMED CALI FAARAX

XEER WASAARADDA GAADIIDKA
Tr. 2 Maarso 1974, L. 62.

Dhisid Gudd Tijaabada iyo Imtixaanada Baaburta Gobolka Jubada Hoose.

## XOGHAYAHA WASAARADDA GAADIIDKA

HADDII UU ARKAY Axdigii Koowaad iyo kii Labaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

HADDII UU ARKAY Qodobka 47 iyo 52 ee sharciga Waddooyinka riradiisuna ahay 4 soona baxay 16-12-1962;

MARKII UU GARTAY Inay lagama maarmaan tahay in la magacaabo Guddi ah kuwa sancada (Tecnico), guddigaasoo hawshoodu tahay tijaabada joogtada ah iyo midda sonnadkiiba mar lagu sameeye baabuurta Dalka, joogta imtixaanada lagu bixiyo Leeysimada wadidda baabuurta.

## WUXUU XEERAY

### Qodobka 1aad

In la dhiso Guddi loo xilsaaro tijaabada bqbuurta iyo Imtixaanada wadidda babuurta, Gobolka Jubada Hoose, Guddiga waxa saldigiisu noqon doonaa Kismayo.

### Qodobka 2aad

Guddiga tijaabada wuxuu kooban yahay:

1. Mideeyaha Wasaaradda Gaadiidka,
2. Sargaal ka mid ah Booliska Waddooyinka,
3. Makaanik ka mid ah Wasaaradda Gaadiidka,
4. Karaani ka mid ah Wasaaradda Gaadiidka.

### Qodobka 3aad

Sharciga u degsan waddooyinka ee soo baxay 31kii Oktoobar 1963 dii, wuxuu swood u siinayaa Guddiga tijaabada inay fiire dheer u lahaadaan baarista baabuurta si loo hubiyo nabad galiyada waddooyinka.

### Qodobka 4aad

Waajibaadka Guddigu wuxuu yahay:

b) Tijaabada iyo baarista fiicnaanta baabuurta iyo Nabadgeliyada xagga Waddooyinka, Rasminimada warqadeha baabuurku dalka ku yimid iyo hubsashada in la bixiyoy Cashuurta Dawladda.

t) Xaqiijinta aqoonta Qofku u leeyahay xagga baabuurta, iyo sancada iyo Calaamooyinka waddooyinka siduu u mari lahaa.

j) Eegidda baabuurta sannad walba inay dhanyihiin shuruurdaha Xeerka xagga Nabad geliyada socodka u degsan.

Qodobka 5aad

Go'aanka Guddigu wuxuu ansax markay wada joogaan, haddii ay sawdkoodu sinmaan waxa ansax ah mosha Guddoomiyha Guddigu uu raaco.

Qodobka 6aad

Guddoomiyaha Guddiga tijaabada iyo imtixaanada wadidda baabuurta markay u dhamaato shaqada la Xiriirta baariste iyo Sancada, haddii ay jiraan baabuurro summad cusub loo rabo, Shufaarro Leeysino cusub loo rabo waa in la soo gudbiyaa warqadahooda oo dhan Xafiiska Xusuus Hayaha Guud ee Baabuurta Dadweynaha sidii loogu samayin lahaa oo qaybta ka dhiman hawsha oo ah in summad baabuurta loo siiyo iyo buugagga Milkiyaddu ay ku qoran tahay, Shahaadooyinka cusub ee lagu wado baabuurta.

Qodobka 7aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa taariikhda 10ka Maarso 1974, waxaana lagu soo dhigi doonaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, Tr. 2 Maarso 1974.

*G. Dh. Muusa Rabiile Good*
Xoghayaha Wasaaradda Gaadiidka

---

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

---

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cusmaan Shiikh Aaden, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 4-5-74kii, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo Soohdin:
leh qiyaas afar gees siman 13,50x13,50 kuna fadhiya 182,25 mdh.
Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.
Koofur waxaa ka xiga: Cabdullahi Cilmi.
Galbeed waxaa ka xiga: Xiirey Gaasim.
Bari waxaa ka xiga: Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqadisho, 8 Juun 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Ini. C. C. Guuleed*

*(142)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdirashiid Shiikh Nuur, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 22-11-1972, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda 21 ka Oktoobar, oo leh qiyaas rektaangolaar, kuna fadhipa 30x20 = 600 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka viga: Jidka.
Koofur waxaa ka xiga: Gabal dhul lamb. 758.
Galbeed waxaa ka xiga: Gabal dhul lamb. 751.
Bari waxaa ka xiga: Gabal lamb. 753.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 8 Juun 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. C. C. Guuleed*

*(143)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdi Guuleed Xersi Sharmaarke, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 14-5-74kii, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadaag, oo leh qiyaas afar gees siman, kuna fadhiya 27x27 = 729 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.
Koofur waxaa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Jid.
Bari waxaa ka xiga: Jidka Hawl-Wadaag.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 8 Juun 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. C. C. Guuleed*

*(144)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Caasha Ismaaciil Jaamac, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 25-5-74kii, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna fadhiya 20x20 = 400 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.
Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 7.
Galbeed waxaa ka xiga: lamb. 1.
Bari waxaa ka xiga: lamb. 3.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 8 Juun 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(145)* *Inj. C. C. Guuleed*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Baddalaad naado dhul uu lahaa Jaalle Muumin Abooke Abuukar iyo Amin Xasan Awes, kuna yaalo Muqdisho, xaafadda wardhiigley. — T. G. 242-60.*

Jaallaha kor ku magacaaban oo horay loo siiyay dhul yaal Muqdisho xaafdda kor ku qoran, kuna fadhiyay 1600 mdh.

Waxaa la caddeynayaa in dhulka iska beddelay sidii hore, sababtuna waxay tahay in jid dan guud ah looga baahday meesha iyada ah.

Sidaas awadeed dhulkaa imminka haray wuxuu ka kooban-yahay 1480mdh.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddatiradeedu ahayd 442076 ee 8-12-1963kii, kaxay isku badashay sida soo socota: Dhlka cusub ee badallada ah wuxuu ku yaal Muqdisho, xaafadda Yaaq-Shiid jidka balcad wuxuuna leeyahay qiyaas rektaangolaar ah addimihiisuna yihiin 30x20 kuna fadhiya 600 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 97.
Koofur waxa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Ddul Lamb. 75.
Bari waxaa ka xiga: Jidka Balcad.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(146)* *Maxamed Cabai Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Baddalaad naado dh uluu leeyahay Jaalle Maxamed Cabdulqaadir Abduraxman, kuna yaal Muqdisho, Xafadda C. Latte — T. G. 415-67.*

Jaallaha kor ku magacaaban oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho xaafadda kor ku qoran, kuna fadhiya 3000 mdh., waxaa la caddeynayaa in loog qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd MWD-415-1072-68 ee 22-6-68, waxay isku baddashay sida soo socota:

Dhulka cusub wuxuu ku yaal Muqdisho, Xafadda 21 Oktoobar, waxuuna leeyahay qiyaas rektaangolar addimihiisuna yihiin 30x20, kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdin:
Waqooyi: waxaa ka xiga: Dhul L. 390.
Koofur waxaa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul L. 400.
Bari waxaa ka xiga: Dhul L. 402.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(147)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Qaasim Cali Maxamed, kuna yaal Muqdisho, Xaafadda Shibis — T. G. 1072-67.*

Jaallaha kor ku magacaaban oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho xaafadda kor ku qoran, kuna fadhiya 360 mdh., waxaa la caddeynayaa in loog qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd MWD-1072-916-68, waxay isku baddashay sida soo socota:

Dhulka cusub wuxuu ku yaal Muqdisho, Xaafadda Shibis waxuuna leeyahay qiyaas rektangolaar ah addimihiisuna yihiin 24x12, kuna fadhiya 288 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Caasha Cali iyo Saalin Cali.
Koofur waxaa ka xiga Jidka Nasiid Buunte.
Galbeed waxaa ka xiga Jid.
Bari waxaa ka xiga: Jid.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. C. C. Guuleed*

*(148)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Moxiddiin Caddow Maxamed, kuna yaal Muqdisho, Xaafadda C. Boteego. — T. G. 771-66.*

Jaallaha kor ku magacaaban oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho xaafadda kor ku qoran, kuna fadhiya 3C00 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd BF-771-242-67 ee 11-9-1967, waxay isku baddashay sida soo socota:

Dhulka cusub wuxuu yaal Muqisho, Xaafadda 21 Oktoobar, waxuuna leeyahay qiyaas Trapeesiyo ah addimihiisuna yihiin 30; 18; 30, kuna fadhiya 720 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.
Koofur waxaa ka xiga: Dhul L. 491.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul L. 413.
Bari waxaa ka xiga Jid.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(149)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Badalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Cabdulqaadir Cali Xersi — T. G. 1571-58 kuna yaal Muqdisho Xaafadda Hodan.*

Jaallaha kor ku magacaaban horay loo siiyay dhul ku yaal Muqdisho xaafadda kor ku qoran, kuna faxhiya 1386 mdh. , waxaa la caddeynayaa in dhulka cadadiisa aan kor ku sheegnay gabal ka mid ah oo dhan 530 mdh. lagala wareegay dan guud awadeed.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddii tiradeedu ahayd 10-12-68 ee 1-6-1960kii wuxuu isku bedelay 856 mdh. Soohdimahana waxba iskama bedelin.

Dhulka Cusub ee loogu badalay dhulkii looga qaaday danta Guud ahaaneed wuxuu ku yaal Muqdisho, Xaafadda Yaaq-Shiid qiyaaskiisuna waa rektangolaar addimihiisu yihiin 20x30 kuna fadhiya 600 mdh.

Waqooyi waxaa xiga: Dhul Lamb. 65.
Koofur waxaa ka xiga Dhul Lamb. 104.
Galbeed waxaa ka xiga: Jid.
Bari waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 102.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cadi Saciid*

*(150)*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*Baddalaad naado dhul uu leyahay Jaalle Mariyan Cabdulle Siyaad, kuna yaal Muqdisho, Xafadda Hawl-Wadag — T. G. 553-67.*

Jaallada kor ku magacaaban oo horay loogu naadshay dhul ku yaal Muqdisho — Xafadda jueeddada ku qoran, kuna fadhiya 560 mdh., waxaa la caddeynayaa in uu iska baddalay sidii hore ee lagu soo diray warqadda tiradeedu hayd MW-3-23-1092.

Dhulka kaxuu sku baddalay qiyaas ah «L» addimihiisuna yihiin 8,40; 39,20; 28,40; 38,40 kuna fadhiya 467,75 mdh. sohdimihiisa waxba iskama baddalin.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(151) *Inj. C. C.Guleed*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Kadiija Abuukar Sheeqey, kuna yaal Muqdisho, Xafadda Waaberi — T. G. 635-72.*

Jaallaha kor ku magacaaban oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho xaafadda kor ku qoran, fadhiya 250 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd MW-3-23-1605 ee 24-12-1972, waxay cusub wuxuu ku yaal Muqdisho, Xaafadda Waaberi, waxuuna leeyahay qiyaas rektangolaar addimihiisuna yihini 20,60x13, kuna fadhiya 267,80 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Cumar Geedow.

Galbeed waxaa ka xiga: Hadhuunada Maxamed Xamarow.

Bari waxaa ka xiga: Jidka Uganda.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(152) *Maxamed Cabdi Saciid*

## DEGMADA BAYDHOBA

### *DIGNIIN KU SAABSAN DHUL*

Waxaa loo shegahayaa dhamaamba dadka degan magaaladda Baydhaba in aanu soo dhejinay digniinkaas ee uu dheganaan doono muddo 30 (sodon) casho ah, digninkaas wuxuu ku saabsanyahay dhul uu soo weydiistay ninka magaciisu la yiraahdo jaalle: Xaaji Saalax Cabduraba, loona yaqaano (Xaaji) Sanley) oona degan magaalada Baydhabo.

Jaallahaas wuxuu u soo dhigtay xaashadaas in uu gato dhulkaas ku yaal magaalada Baydhabo, xaafadda Howl-Wadaag (taasoo ay idiin caddeynayso tusaaleeskxda «Planimctria») oo yaalo xafiiska guddoonshaha guddiga degmada Baydhaba. .

Dadka ay dani uga jirto waxaa loo shegahayaa in ay war faah faahin ka heli doonaan xafiiska Guddoonshaha Guddiga Degmada Baydhabo.

Baydhabo, 29 Jennayo 1973ka.

Gudoonshaha Guddiga Degmada Baydhabo

*153)* *Dhame: Maxamed Salax Xaaji Axmed*

---

## MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR

Markaan arkay; weydiinta Faarax Yuusuf Madar;

Markaan arkay; Qod. 69 D. L. 1965 N. 2;

Waxaa cad dhumista Jeegga L. 015617 kuna qoran tahay 1.600, ee Bankiga Kaydiska iyo Amahda Soomaaliyeed;

Waxaana amaryaa in loo cusbooneysiiyo mar labaad jeegga aan kor ku sheegayaa muddo 15 beri (shan iyo taban beri) oo ka bilaabata markii lagu dhiigo (Bollettino Ufficiale) haddan la heline cid sheegta waana in gacanta laga saaro ninka magaciisu kor ku qoran yahay ama qof sita wakaalad sharci h ayadoo la sugaayo 15 beri.

Muqdisho, 25-6-1974.

Gudoomiyaha Maxkamadda Gobolka Xamar

*(154)* *Dr. Yaasin Shire Faarax*

## MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEISA

COSOB MAXAMED ROOBLE — Arjileh

iyo

BANKIGA KAYDKA IYO AMAHDA — Dood celiye.

## D I G R I I

Cosob Xasan Ismaciil way i hor timid ayada oo ah qofka haystay Jeega Lambarkiisu yahay 0645 dhan U. S. $ 320/- oo taariikhdiisuna ahayd 16 Dicember 1973, waxaan i tusay warqadii Maamulaha Bankiga Kaydsiga iyo Amaahda u ku cadeeyay in Jeega wareega ka lumay.

Waxaan halkan ku bixinaya amarkan anigo oo cuskanaya Qodobka 27 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee 9kii Sebtember 1965, Jeega wareega ee Lambarkiisu yahay 0645 in la baabi'iyo.

Waxaan amar ku bixinaya:

A) Lagu qoro Faafinta Rasmiga ah.

B) Lacagta h US $ 320,00/- Bankiga u celiyo Arjilaha, 30 Casho dabadeed marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

La qoray Maanta 19kii May 1974.

Guudoomiyaha Maxkamadda Gobolka ee Hargeysa
*Aasan Xaaji Yusuf*

*(155)*

---

## BANKIGA QARANKA SOMALIYEED

Xeer Nidaamiye Lr. 55 ee 5-5-1974.
Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad.

### TALIYAAHA IYO MAAMULAHA GUUD
### EE BANKIGA QARANKA SOOMALIYEED

MARKA ARKEEN Qodobka 10aad ee Xeerka Lr. 12 soona baxay 26-9-64 oo ku hirgalay Sharciga Lr. 8 ee 29-10-64, kuna saabsan daadihinta Ganacsiga Dibadda iyo sarrifka lacagaha qalaad loogu beddeladkaro lcagteenna;

AYAGOO TIXGELINAYA Isbeddelka ka dhexdhacaya qiimaha lacagaha qalaad sida had iyo jeer laga soo tabiyo Sayladaha Caalamiga ah ee Sarrifka Lacagaha;

MARKAANA GARTEEN In la badbaadiyo lana dhowro dhaqaalaha iyo lacagta waddankeenna;

AYAGOO OGSOON In horay loo qaatay go'aan deg deg ah lr. 149 ee 5-5-74 sida Sharciga Bankiga Qaranka Soomaliyeed Lr. 27 ee 26-11-68 uu dhigayo;

## WAXAY GUDDOMIYEEN

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee horay loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos ku qoran, laga bilaabo 6-5-74, waxaana go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga ee Soomaaliya:

| | Lacagta galaad | | | Heerka Bankigu ku iibsanayo | | | Heerka Bankigu ku gadayo |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| US $ | 1 Doollarka Maraykanka | Sh. | So. | 6.2327 | Sh. | So. | 6.3573 |
| UK £ | 1 Giniga Isterlinka | » | » | 14.9089 | » | » | 15.2071 |
| DM. | 1 Maarkaha Jarmalka Gal. | » | » | 2.4824 | » | » | 2.5320 |
| Lit. | 103.21 Liiraha Talyaaniga | » | » | 1.0000 | » | » | ——— |
| Lit. | 101.14 » » | » | » | ——— | » | » | 1.0000 |
| Fr. Fr. | 1 Frankiga Fransaha | » | » | 1.2393 | » | » | 1.2641 |
| Sw. Fr. | 1 Frankiga Suweysara | » | » | 2.0715 | » | » | 2.1129 |
| Dj. Fr. | 1 Frankiga Jabuuti | » | » | 0.03525 | » | » | 0.03596 |

Muqdisho, 5-5-1975.

*Cumar Axmad Cumar*
Maamulaha Guud
*(156)*

*Cabduraxmaan Nuur Xirsi*
Taliyaha

---

## BANKIGA QARANKA SOMALIYEED

---

**Xeer Nidaamiye Lr. 46 ee 14-5-1974.**

**Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad.**

## MAAMULAHA GUUD
## BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED

MARKUU ARKAY Qodobka 10aad ee Xeerka Lr. 12 soona baxay 26-9-64 oo ku hirgalay Sahrciga Lr. 8 ee 29-10-64, kuna saabsan daadihinta Ganacsiga Dibadda iyo sarrifka lacagaha qalaad loogu beddelan karo lacagteenna;

ASSAGOO TIXGELINAYA Isbeddelka ka dhexdhacay qiimaha lacagaha qalaad sida had iyo jeer laga soo tabiyo Sayladaha Caalamiga ah ee Sarrifka Lacagaha;

MARKAANA GARTAY In la badbaadiyo lana dhowro dhaqaalaha iyo lacagta waddankxnna;

ASSAGOO OGSOON In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr. 150 ee 14-5-1974 sida Sharciga Bankiga Qaranka Soomaaliyeed Lr. 27 ee 26-11-68 uu dhigayo;

WUXUU GUDDOOMIYEY

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee horay loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida ku qoran, laga bilaabo 16-5-74, waxaana go'aankaan lagu soo caddayn doonnaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga ee Soomaliya:

| | Lacagta qalaad | Heerka Bankigu ku iibsanayo | | | Heerka Bankigu ku gadayo | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| US $ | 1 Doollarka Maraykanka | Sh. | So. | 6.2327 | Sh. | So. | 6.3573 |
| UK £ | 1 Giniga Isterlinka | » | » | 14.9089 | » | » | 15.2071 |
| DM. | 1 Maarkaha Jarmalka Gal. | » | » | 2.5320 | » | » | 2.5826 |
| Lit. | 102.18 Liiraha Talyaaniga | » | » | 1.0000 | » | » | ——— |
| Lit. | 100.14 » » | » | » | ——— | » | » | 1.0000 |
| Fr. Fr. | 1 Frankiga Fransaha | » | » | 1.2703 | » | » | 1.2957 |
| Sw. Fr. | 1 Frankiga Suweysara | » | » | 2.1336 | » | » | 2.1763 |
| Dj. Fr. | 1 Frankiga Jabuuti | » | » | 0.03525 | » | » | 0.03596 |

Muqdisho, 14-5-1974.

*Cumar Axmad Cumar*
Taliye K.M.G.

*(157)*

---

BANKIGA QARANKA SOMALIYEED

---

**Xeer Nidaamiye Lr. 57 ee 15-5-1974.**
**Heerka Sarrifka Xisaabaha Kiliirinka.**

MAAMULAHA GUUD
BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED

MARKUU ARKAY Qodoka 10aad ee Xeerka Lr. 12 soona baxay 26-9-64 oo ku hirgalay Sharciga Lr. 8 ee 29-10-64, kuna saabsan daadihinta Ganacsiga Dibadda iyo sarrifka lacagaha qalaad loogu beddelan karo lacagteenna;

ASSAGOO TIXGELINAYA Isbeddelka ka dhexdhacaya qiimaha lacagaha qalaad sida had iyo jeer laga soo tabiyo Sayladaha Caalamiga ah ee Sarrifka Lacagaha;

MARKAANA GARTAY In la badbaadiyo lana dhowro dhaqaalaha iyo lacagta waddankeenna;

ASSAGO OGSOON In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr. 151 ee 15-5-1974 sida Sharciga Bankiga Qaranka Soomaliyeed Lr. 27 ee 26-11-68 uu dhigayo;

WUXUU GUDDOMIYEY

IN geniga Isterliinak ee xisaabaha kiliirinka oo aynu la leenahay USSR, Masar iyo Shiinaha Dadka lagu sarrifi doono heerka iibsashaddaa yo kan gadidda ee had iyo jeer Bankigaani soo saaro, marka laga bilaabo bisha Maajo 20da, 1974.

Waxaana go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga ee Soomaliya.

Muqdisho, 15-5-1974.

*Cumar Axmad Cumar*

Taliye K.M.G.

*(158)*

---

**BANKIGA QARANKA SOMALIYEED**

---

**Xeer Nidaamiye Lr. 58 ee 6-6-1974.**
**Heerèa Sarrifka Lacagaha Qalaad.**

MAAMULAHA GUUD

BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED

MARKUU ARKAY Qodobka 10aad ee Xeerka Lr. 12 soona baxay 26-9-64 oo ku hirgalay Sharciga Lr. 8 ee 29-10-64, kuna saabsan daadihinta Ganacsiga Dibaddaiyo sarrifka lacagaha qalaad loogu beddelan karo lacagteenna;

ASSAGOO TIXGELINAAYA Isbeddelka ka dhexacaya qiimaha lacagah-haa qalaad sida had iyo jeer laga soo tabiyo Sayladaha Caalamiga ah ee Sarrifka Lacagaha;

MARKAANA GARTAY In la badbaadiyo lana dhowro dhaqaalaha iyo lacagta waddankeena;

ASSAGOO OGSOON In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr.154 ee 6-6-1974 sida Sharciga Bankiga Qaranka Soomaliyeed Lr. 27 ee 26-11-68 uu dhigayo;

WUXUU GUDDOOMIYEY

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee horay loogu cadeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos ku qoran, laga bilaabo 9-6-74, waxaaana go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga ee Soomaliya:

| | Lacagta galaad | | | Heerka Bankigu ku iibsanayo | | | Heerka Bankigu ku gadayo |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| US $ | 1 Doollarka Maraykanka | Sh. | So. | 6.2327 | Sh. | So. | 6.3573 |
| UK £ | 1 Giniga Isterlinka | » | » | 14.9089 | » | » | 15.2071 |
| DM. | 1 Maarkaha Jarmalka Gal. | » | » | 2.4687 | » | » | 2.5181 |
| Lit. | 102.69 Liiraha Talyaaniga | » | » | 1.0000 | » | » | ——— |
| Lit. | 100,64 » » | » | » | ——— | » | » | 1.0000 |
| Fr. Fr. | 1 Frankiga Faransaha | » | » | 1.2703 | » | » | 1.2957 |
| Sw. Fr. | 1 Frankiga Suweysara | » | » | 2.0909 | » | » | 2.1327 |
| Dj. Fr. | 1 Frankiga Jabuuti | » | » | 0.03525 | » | » | 0.03525 |

Muqdisho, 6-6-1974.

*Cumar Axmed Cumar*

Taliye K.M.G.

*(159)*

---

BANKIGA QARANKA SOMALIYEED

---

**Xeer Nidaamiye Lr. 59 ee 14-6-1974.**

**Heerka Sarrifka Lacagta Qalaad.**

MAAMULAHA GUUD

BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED

MARKUU ARKAY Qodobka 10aad ee xeerka Lr. 12 soona baxay 26-9-64 oo ku hirgalay Sharciga Lr. 8 ee 29-10-64, kuna saabsan daadihinta Ganacsiga Dibadda iyo sarrifka lacagaha qalaad loogu beddelan karo lacagteenna;

ASSAGOO TIXGELINAYA Isbeddelka ka dhexdhacaya qiimaha lacagaha qalaad sida had iyo jeer laga soo tabiyo Sayladaha Caalamiga ah ee Sarrifka Lacagaha;

MARKAANA GARTAY In la badbaadiyo lana dhowro dhaqaalaha iyo lacagta waddankeenna;

ASSAGOO OGSOON In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr. 155 ee 14-6-1974 sida Sharciga Bankiga Qaranka Soomaliyeed Lr. 27 ee 26-11-68 uu dhigayo:

## WUXUU GUDDONSHAY

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee horay loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos ku qoran, laga bilaabo 16-6-1974, waxaana go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga ah ee Soomaliya:

| | Lacagta galaad | | Heerka Bankigu ku iibsanayo | | Heerka Bankigu ku gadayo |
|---|---|---|---|---|---|
| US $ | 1 Doollarka Maraykanka | Sh. So. | 6.2327 | Sh. So. | 6.3573 |
| UK £ | 1 Giniga Isterlinka | » » | 14.9089 | » » | 15.2071 |
| DM. | 1 Maarkaha Jarmalka Gal. | » » | 2.5057 | » » | 2.5558 |
| Lit. | 102,69 Liiraha Talyaniga | » » | 1.0000 | » » | ——— |
| Lit. | 100,64 » » | » » | ——— | » » | 1.0000 |
| Fr. Fr. | 1 Frankiga Fransaha | » » | 1,2703 | » » | 1.2957 |
| Sw. Fr. | 1 Frankiga Suweysara | » » | 2.1118 | » » | 2.1540 |
| Dj. Fr. | 1 Frankiga Jabuuti | » » | 0.03525 | » » | 0.03525 |

Muqdisho, 14-6-1974.

Bankiga Qaranka Soomaliyeed
*Maamulka Guud*

*(160)*